

Korona – warbixin waalidka ku socoto kuna saabsan maalin-dugsiyeedka

Si loo xaddido kala qaadista cudurrada ayaan halwgallo badan ka billownay dugsiya. Nalalka samaanfahaa ee kala ah heerarka cagaarka, jaallaha iyo guduudku waxay na tusayaan hawlgallada looga hor tagayo in cudur la kala qaado ee heerarkaas kala duwan ka jira dugsiyada. Xaaladda kala qaadista cudurrada ee Norway ayay ku xiran tahay hadba heerka uu dugsiya raacayo.

Waa ammaan in ay carruurta dugsiyada aadaan

Weli waan ka taxaddari doonaa in ay ardaydu helaan bey'ad dugsi oo fiican islamarkaana ammaan ah. Dhammaan dadka dugsiya ka shaqeeya ayaa la socon doona in ay xaaladda ardaydu tahay mid wanaagsan. Muddada soo socotana waxaan si gaar ah uga taxaddari doonaa in aan si fiican u hubinno ka hor tagga cudurrada. Waxaan si gaar ah ula soconaynaa:

- In aan qofna dugsiya ama SFO imaannin haddii uu jirran yahay.
- In aad gacmaha iska dhaqdaan ka hor inta aydnaan dugsiya imaannin.
- Gacmaha oo si fiican laysaga dhaqo iyo nadaafaddu waa muhiim marka dugsiya la joogo.

Sidee ayuu noqon doonaa maalin-dugsiyeedku?

Heerka cagaarka ah: Maalin-dugsiyeedku waxay noqon doontaa sidii caadiga ahayd, laakiin ardayda iyo macallimiintu waa in aysan gacanta iska salaamin habna aysan isa siinnin.

Heerka jaallaha ah: Fasallada oo dhan ayaa isu imaan kara, ardayda oo dhan na waxbarasho buuxda ayaa dugsiya lagu siinayaa ayada oo maalmaha dugsiya yihiin kuwo caadi ah. Waxaa dhici karta in barxadda dugsiya la kala qaybiyo si fasallada loo kala duwo. Ardayda iyo macallimiintu waa in aysan gacanta iska salaamin habna aysan isa siinnin, dad badanna aysan hal meel isugu soo ururin.

Heerka guduudan: Ardayda waxaa loo kala qaybin doonaa kooxo yar-yar. Waxaa laga yaabaa in aan xaddidno tirada ardayda ee dugsiya imaan karta. Waxaa sidoo kale dhici karta in aan ardayda ka codsanno in ay dugsiya yimaadaan wakhtiyo kala duwan. Waa in aan masafo fiican isu jirsannaa, ardayduna in badan ayay bannaanka joogi doonaan, taas oo dhici doonta xataa xisadaha caadiga ah.

Geynta dugsiya

Heerka jaallaha ah: Ardayda u baahan in dugsiya la geeyo, waxay dugsiya ku tegi karaan oo uga soo laaban karaan bas ama gaadiid kale. Ardaydu waa in ay masafo fiican u jirsadaan dadka kale. Laakiin shardi ma aha in ay ardaydu hal mitir u jirsadaan ardayda kale, in kasta oo sidaas laga rabo dadka kale ee gaadiidka saaran.

Heerka guduudan: Haddii ay ardaydu raacaan baska dugsiya ama gaadiid kale, waa in ay xasuustaan in ay dadka u jirsadaan masafo fiican – hadday ahaan lahayd inta ay baska sugayaan iyo marka ay galaan labadaba. Ardaydu waa in ay eegaan haddii ay suurtaggal tahay in ay gaadiid kale dugsiya u qaataan.

Waajibka waxbarashada ee ardayda oo dhan

Ardayda oo dhan waxbarasho ayay xaq u leeyihiin, dugsiguna wuxuu ardayda oo dhan u hubinayaa waxbarasho wanaagsan ayada oo aan taasi ku xirnayn in heerka kala qaadista cudurrada uu yahay cagaar, jaalle ama guduud.

Haddii aad wax su'aal ah qabto – dugsigu la soo xiriir 